



Horumarinta Qorshaha Ka-hortagga Dhibaatooyinka Shakhsiyeed (IAPP)

BIXIYEYAASHA DARYEELKA GURIGA (HOME CARE PROVIDERS)

Dhammaan macaamiisha ka helaya adeegyo Bixiyeyaasha Daryeelka Guriga waxaa sharci ahaan looga baahan yahay inay yeeshaan Qorshaha Ka-hortagga Dhibaateynta Shakhsiyeed (IAPP). Hoos waxaa ku xusan habab lagu taliyay oo adeegbixiyeyaasha isticmaali karaan marka ay la diyaarinayaan IAPP macaamiisha laga yaabo inay ka walaacaan ama ka labalabeeyaan ka-qaybgalka samaynta qorshahan.

Waxyaabaha Maskaxda Lagu Hayo

Aan ka hadalno waxa aan ka ognahay bulshada kala duwan ee ay Bixiyeyaasha Daryeelka Gurigu u adeegaan ee ku nool Minnesota.

- Qaar ka mid ah macaamiisha waxay ka baqaan in buuxinta IAPP ay ka dhigan tahay in ay nugul yihiin ama aanay wax qaban karin. Waxay u arki karaan in tani ka hor imanayso sida ay isku arkaan—oo ah dad madax-bannaan oo naftooda daryeeli kara.
- Qaar kale oo macaamiisha ka mid ah waxay helaan Daryeelka Guriga iyaga oo aan u baahnayn daryeel, balse u taageeraya lamaanhooda u baahan caawimaad. Sidaas darteed, waxay u arki karaan in IAPP-gu aanu khusayn noloshooda gaarka ah.
- Macaamiil badan waxaa laga yaabaa inay la nool yihiin xaalado caafimaad-dhimir (kuwa la ogaaday ama aan la ogeyn) kuwaas oo saamayn kara fahamkooda, sida ay u hadlayaan, ama sida ay diyaar ugu yihiin inay ka qaybqaataan. Xaaladahan ayaa sidoo kale saameyn kara sida ay uga jawaabaan su'aalaha la xiriira tacaddiga, halista, ama badbaadada.

Muhiimadda Luuqadda

In la buuxiyo IAPP waa shardi, laakiin sida uu shaqaalaha loo xilsaaray—ha ahaado qofka qaabilaadda ama shaqaale kale—ula falgalo macaamil kasta, u aqoonsado meelaha khatarta laga yaabo inay ka dhalan karto, uguna diyaariyo qorshe u gaar ah, ayaa go'aamin kara in macaamilku ka qaybqaato oo si daacad ah uga jawaabo su'aalaha.

Macaamiishu mararka qaarkood ma jecla in lagu qeexo “qof nugul.”

Haddii ay suuragal tahay, ka fogow isticmaalka ereyada sida ‘nugul,’ ‘halis,’ ama ‘tacaddi.’ Diiradda saar wada hadal iyo su'aalo kuu horseedaya in aad hesho isla jawaabaha aad u baahan tahay.

Ka fogaaw inaad si toos ah u akhrido su'aalaha ku qoran foomka, ama isticmaalka luuqad ay dadka deggan u fasiran karaan in ay ka dhigan tahay in madax-bannaanidoodu yar tahay ama aanay is daryeeli karin, iyo wixii la mid ah.

Ku billaaw su’aalaha adigoo waydiinaya, ‘Sidee ayaad u...?’, ‘Marka aad samaynayso...?’, ‘Muxuu u egyahay marka...?’ iyo ‘Haddii qof sidan sameeyo..., sidee ayaad uga falcelin lahayd?’”

Haddii macaamilka ka leexdo mawduuca ama uu bilaabo inuu aad u faahfaahiyo, arrintan waxaad u rogi kartaa fursad lagu weydiyo su’aalo dheeraad ah oo kaa caawin kara qiimeynta khatarta ama helitaanka taariikh bulsheed oo dheeraad ah. Inta badan ee aad si firfircoon ula falgasho, ayay kalsoonidiisu kuu kordheysaa.

Habka Loo Wajaho

Adeegbixiyeyaasha waxaa sidoo kale lagu dhiirigelinayaa inay dib u eegaan cidda loo xilsaaray inay la diyaariyaan IAPP macaamiisha cusub. Waxaa muhiim ah in dib loo eego habraaca qaabilaadda, lana hubiyo in hawshan loo dhiibo shaqaale tababaran oo xirfad leh, awoodna u leh inuu waqti dheeri ah geliyo weydiinta su’aalaha iyo dhisidda xiriir wanaagsan oo faa’iido u leh diyaarinta IAPP-ga. Waxaa habboon in IAPP-ga aan lagu diyaarin waqti ciriiri ah ama iyadoo lagu dhex jiro buuxinta dukumeentiyo badan ama qiimeynno kale, sababtoo ah arrintaasi waxay keeni kartaa daal, yaraanta waqti, iyo in geeddi-socodku noqdo mid la degdegay, taas oo saamayn ku yeelan karta tayada xogta la helayo. Waxaa aad muhiim u ah in qofka buuxinaya IAPP-ga uu dib u eego taariikhda bulshada iyo caafimaadka ee macaamilka cusub ka hor inta uusan la kulmin si loogu diyaariyo IAPP-ga. Tani waxay ka caawinaysaa fahamka nooca su’aalaha la weydiin doono iyo jihada lagu hagi doono wada hadalka. In lala wadaago macaamilka, haddii aan diiwaannada ka soo horjeedin, in taariikhdooda la akhriyay, waa hab kale oo lagu hagayo wada hadalka haddii loo baahdo.

Arrimo Kale oo Tixgelin u Baahan

Marka la diyaarinayo IAPP-ga, waxa muhiim ah in la tixgeliyo nooca deegaanka uu macaamilku ku nool yahay—tusaale ahaan hoyga dadweynaha, guri ama guri dabaq ah, iyo heerka helitaanka ama ku habboonaanta guriga. Waxaa sidoo kale muhiim ah in la ogaado dadka uu macaamilku la nool yahay iyo dadka kale ee si joogto ah u jooga gurigaas (ma la nool yahay qoys, carruur yar yar, ama waayeel nugul?). Su’aalaha hoose waxaa loo habeyn karaa iyadoo lagu salaynayo qaabka uu qofku u nool yahay iyo dadka uu si joogto ah ula macaamilo.

Su’aalo Tusaalooyin Ah

Tacaddiga ay Dadka Kale u Geystaan

- S. Maxaad samayn lahayd haddii aad dareento inaad ammaan ahayn?
- S. Ma leedahay xiriirro kuu muuqda kuwo ammaan ah? Ka warran kuwo aan ammaan ahayn? Sidee bay u egihiin ama u ekaan lahaayeen?
- S. Ma jirtaa qof aad ka walwalsan tahay inuu ku soo booqdo gurigaaga?
- S. Haddii aad dukaanka joogto oo qof aanad aqoon uu kuu sheego inuu rabbo inuu isticmaalo taleefankaaga ama uu lacag kaa amaahdo, maxaad u malaynaysaa inaad samayn lahayd?
- S. Haddii aad diido, oo uu bilaabo inuu ku qayliyo ama ku hanjabo, maxaad samayn lahayd?

S. Marnaba ma dhacay in qof sidaas kuuula dhaqmo? Sidee bay taasi kuu ahayd?

S. Ma jeceshahay inaad la kulanto dad cusub? Sideed ku sameysaa taas? Ma leedahay xiriir jacayl/shukaansi? Sidee bay taasi u egtahay?

Tacaddiga ama dhib u geysiga dadka kale

S. Ma jeceshahay inaad dadka la joogo, mise inta badan adigaa kaligaa jooga?

S. Marnaba ma ku lug yeelatay muran jireed ama mid afka ah? Haddii haa, qofkee ayey la ahayd?

S. Ma si wanaagsan ayaad ula dhaqantaa qoyskaaga?

S. Ma ii sheegi kartaa wax ku saabsan qaar ka mid ah xiriirradii aad hore u soo martay? Kuwa caafimaad qaba? Kuwa aan caafimaad qabin?

S. Marnaba ma ku jirtay dagaal? Sidee ayuu u ekaa dhacdadaasi?

S. Maxaa ka mid ah waxyaabaha ku cadhaysiiya ama ku dhibsiiya? Maxaad samaysaa marka aad xanaaqsan tahay ama aad walwalsan tahay?

S. Marnaba ma kugu adkaataa inaad deggenaato oo aad is dejiso? Taasi ma wax ayaad ka shaqaynaysaa inaad hagaajiso?

Is-dhibaateynta (Tacaddiga qofku naftiisa u geysto)

S. Sidee ayaad u qorsheynaysaa inaad bulshada uga faa'iidayso ama adeegyada uga gaarto?

S. Sidee ayaad ugu wareegi doontaa meelaha aad u baahan tahay inaad tagto?

S. Ma jiraa wax ku saabsan inaad habeenkii kaligaa dibadda uga baxdo aaggani oo aad ka walwalsan tahay?

S. Marnaba ma dhacday inaad lumto ama aad dhaawacanto adigoo bannaanka ku jira? Ma isticmaashaa qalabkaaga (tusaale bakooraad, kursi curyaamiinta, iwm.)?

S. Sidee bay wax u egyihiin marka aadan qaadan daawooyinkaaga? Ma jiraan calaamado lagu garan karo?

S. Sidee ayaad u maamushaa daawooyinkaaga? Marnaba ma dhacday inaad qaadata daawo ka badan intii lagu qoray, ama aad gabi ahaanba joojiso?

S. Ma u malaynaysaa inaad si fiican u garan karto marka uu caafimaadkaaga dhimirka ku adkaanayo—sida marka aad murugoonayso ama aad niyad-jabsan tahay? Marnaba ma ku soo dhacday fikir ah inaad naftaada waxyeello u geysatid?

S. Ma ku kalsoon tahay inaad si madax-bannaan u maareyn karto dhaqaalehaaga? Haddii loo baahdo, ma leedahay qof aad ku kalsoontahay oo kaa caawin kara go'aamada maaliyadeed? Ma ka warqabtaa khiyaamooyinka lagu beegsado dadka waayeelka ah (lacag lagu waydiisto, email-

ka khiyaanada ah, iwm.)?

S. Ma dareentaa inaad si fiican naftaada u daryeesho? Maxaad u aragtaa in ay muhiim tahay is-daryeelku?

S. Ma si joogto ah ayaad u cuntataa oo u dhaqataa? Ma jiraan meelaha is-daryeelka oo kuugu adkaaday waayihii hore?

S. Ma haysataa cunto ku filan oo aad si fudud u heli karto?

Dib-u-Eegista IAPP

IAPP-ga waa dukumeenti isbeddela oo joogto ah, waxaana muhiim ah in kooxda daryeelku dib u eegto oo wax ka beddesho marka ay dhacaan dhacdooyin, isbeddel ku yimaado xaaladda macaamilka, ama duruufo cusub soo baxaan. Kooxda waa inay sii wadaa samaynta dukumeentigan iyagoo la kaashanaya macaamilka marka la aqoonsado nuglaansho cusub ama ay wax ka beddelmaan kuwii hore, si uu qorshaha had iyo jeer ugu ekaado baahiyihiisa iyo xaaladdiisa maanta.

Minnesota Department of Health
Health Regulation Division
Collaborative Systems Change
PO Box 64579
St. Paul, MN 55164-0975
651-201-4200
catherine.lloyd@state.mn.us
www.health.state.mn.us

1/05/26

Si aad u hesho macluumaadkan oo ku qoran qaab kale, : 651-201-4200.